



Haddii caabuqa Omicron uu xanuun sahlan yahay, maxaa isbitaaladu u buuxsameen?

Jan 14, 2022

**Jawaab: Way adag tahay jawaabtu.**

**1.** Sida caadiga ah, caabuqa Omikaroon (Omicron) waxaad mooddaa in uu ka sahlan yahay noocyada kale ee caabuqa Koofid-19 (COVID-19): Haddii aad qaadid caabuqa Omikaroon (Omicron), uma badna in aad aad u xanuunsatid.

**2.** Haseyeeshee, caabuqa Omikaroon (Omicron) aad buu dhakhso ugu faafaa. Taa macnaheedu waa in dad badan oo tallaalan ay xoogaa xanuunsanayaan, iyo in dad badan oo aan tallaalneyn ay aad u xanuunsanayaan. Arrimahaan oo dhan waxay culays saaraan isbitaalada.

**3.** Isbitaaladu waxay kaloo u buuxaan sabab ah in ay tirada shaqaalaha isbitaaladu yar tahay: Qaar waxay u maqan yihiin sabab ah in ayaku (ama xubnaha qoyskoodu) qaadeen caabuqa Koofid-19 (COVID-19) oo ay ku jiraan iskarantiil; qaar waxay u maqan yihiin sabab ah in ay daaleen; qaar waxay u maqan yihiin sabab ah in ay shaqada caafimaadka iskaga tageen.

#### Ma ogsooneyd in?

- Xataa haddii caabuqa Omikaroon (Omicron) u muuqdo mid xanuun sahlan, wali waa muhiin in la raaco talooyinka kala fogaanshaha iyo kuwa kaloo badbaadada bulshada.
- Dadka u baahan daryeelka degdegga ah ee caabuqa Koofid-19 (COVID-19) intooda badan waa kuwo aan tallaalneyn. Guud ahaan, qiyaastii 1 baa 10 kii Kanadiyaan ah aan tallaalneyn; haseyeeshee dadka jiifa qeybta daryeelka gaarka ah , qiyaastii 1 baa 5 tii qof aan tallaalneyn.
- Dhakhtarrada iyo saynisyahanadu waxay wali aad uga shaqeynayaan in ay darsaan caabuqa Omikaroon (Omicron), iyo waxyaabaha aan wali xanuunka laga ogaan.

Qoraalka xogahaan waxaa ansixiyey koox khubaro la-taliyaal ah.

#### Haddii aad dooneysid xogo dheeraad ah?

Waxaad xogo dheeraad ah ee caabuqa Koofid-19 (COVID-19) ka heli kartaa halkaan:

<https://bit.ly/3qQHmOx>

Financial contribution from  
Avec le financement de

Public Health  
Agency of Canada

Agence de la santé  
publique du Canada

Metropolis  
Institute - Institut

